**Waaxda Cadaaladda Maraykanka Saabsan**
*Qaybta Xuquuqda Aadanaha*

**Wasaarrada Waxbarashada Maraykanka**
*Xafiiska Xuquuqda Aadanaha*

**Hindisaha Aqal Cad ee Ku Aasiyan Ameerikanka iyo Dadka Jasiireylayda Baasifgga**

## La Dagaallanka Qoqobka Lagula Kaco Ardayda AANHPI iyo MASSA

Waaxda Cadaaladda Maraykanka ee Qaybta Xuquuqda Aadanaha (CRT) iyo Wasaarrada Waxbarashada Maraykanka Xafiiskeeda Xuquuqda Aadanaha (OCR) ayaa ku meelmariya sharciyada xuquuqda aadanaha ee federaalka dhexdooda dugsiyada dawladda iyo kuwa ay raasamaalayso dowladda federaalku ee dhammaan heerar kasta oo waxbarasho leh. Sharciyadan ayaa difaacaya dhammaantood ardayda, oo ay ku jiraan ardayda Aasiyaan Ameerikaanka, Asaliga Hawaaii, iyo Ardayda Jasiireylayda Baasifgga (AANHPI) iyo Muslimka, Carabta, Sikh, iyo Koonfur Aasiyaan (MASSA), takoorka ku salaysan jinsiyad, midab, asal qaran (oo ay ku jiraan luqadda iyo sifooyinka qowmiyadeed ee la wadaago). CRT ayaa waliba meelmarisa mamnuucyada ku lug leh ku kala qoqobka diineed ee dugsiyada dawladda. Dugsiyadu waa inay ka qaadaan tallaabo dhakhso leh oo ku habboon arrinta inay ka jawaabaan cabashooyinka kala qoqobka, oo ay ku jirto xasaradaynta ama xoog-u-sheegashada salka ku haysa jinsiyad, midab, asal qaran, ama diin. Kuwa soo socda ayaa ah tusaalooyinka ficilka, ama mararka qaarkood ficil-la'aanta, saraakiisha dugsiga ee ku xadgudbi kara meelmarinta sharciyada CRT ama OCR:

- *Arday Kuuriyaan-Ameerikaan ah ayaa u sheegtay maamulaheeda dugsi inay koox arday Kuuriyaaan ahi si noqnoqod leh uga xadeen buugaagteeda waxbarasho ee taariikhda Aasiya oo ku dhahay inayna iyadu ahayn "Kuuriyaan dhab ah" maadaama ay kaliya ku hadashop Ingiriisiga. Maamulaha dugsiga ayaa ku dhahay iyada maadaama ardayda iyada dhibaataynaysaa ay yihiin Kuuriyaan, waxay u badan tahay inay kaliya tahay is-afgaranshawaa saaxiibbo dhexdood ka kala dhacay oo maamuluhu ma qaadin wax tallaabo ah.*

- *Arday Sikh ah ayaa madax duub u soo gashaday dugsiga. Macallin ayaa u sheegay ardayga inuu iska saaro duubka badbaadadiisa awgeed, sababtuna tahay colaadda lagu bartilmaansanayo Muslimiinta ku nool deegaanka. Ardayga ayaa u sheegay macallinka inuu isagu yahay Sikh. Markuu diiday inuu iska saaro duubka, ayaa waxbarashadii laga hakiyay.*

- *Arday ka soo jeeda Shiinaha ayaa waxbarshadii looga hakiyay in-ka-baxsan-dugsiga ku xadgudub xeerka anshaxa dugsiga awgeed. Kahor intuuna la kulmin kaaliyaha maamulaha dugsiga si ay uga wada hadlaan ka hakinta, waalidka ardayga ayaa codsaday turjubaan, laakiin maamulayaasha dugsiga ayaan u diyaarin turjubaan. Markuu waalidku yimid kulankii, meesha ma jirin turjumaan oo kaaliyihii maamulaha dugsiga ayaa arrintii halka ka sii waday.*

- *Mar lagu guda jiray cashar ku saabsanaa 9/11, ayay arday dugsiga dhexe wada dhiganayeen arday Muslim ah ayay isaga ku dheeen waxaad tahay argagixiso markaa ku noqo dalkaagii. Macallinkii ayaa u sheegay fasalkiiin qaar ka mid ah muslimiintu kaliya yihiin argagixiso, oo u markaa weyddiiyay ardaydii sababta Muslimiintu ayna u cambaarayn weerarradii argagixisada ee 9/11. Ardaygii ayaa uga cawday sarkaal dugsi arrimihii ku saabsanaa hadalladii macallinka iyo ardayda fasalka, laakiin sarkaalkii dugsigu wax tallaabooyin uma qaadin si uu uga jawaabo.*

- *Dugsi sare ayaa siiyaa adeegyada bartaha Ingiriisiga (EL) kaliya ardayda EL ee ku hadla Isbaanishka. Marka arday ku hadsha Af Bunjaabigu ay weyddiisteen adeegyada EL inay ka caawiyaan fasallada meeleyanta sareysa(AP), maamulaha ayaa u sheegay inayna Labadadba adeegyada EL iyo fasallada AP isla qaadan karin.*

- *Koox arday Aasiyaan ah ayay arday kale garaacayeen oo ay ku foorjaynayeen fasal jiim oo ay ku dhahayeen, "Aasiyaanka waxa loo haystay inay ku fiican yihiin xisaabta—ee ma aha kubbadda kolayga." Markay ku cawdeen macallinkana, waxa lagu yiri jawaabta ugu fiicani waa idinka oo is-ilowsiiya ardayda kale oo oo diiradda saara inaad ku fiicnaataan fasalka jiimnka.*

**Qof kasta oo ka warqaba takoorka kala qoqob ka dhaca dugsiyadu ayaa gudbin kara cabasho iyaga oo la xiriira:**

**U.S. Dept. of Justice, Civil Rights Division**
**Qaybta Fursadaha Waxbarashada**
**Iimaylka: education@usdoj.gov**
**Telefoonka: 202-514-4092 ama 877-292-3804**
**TTY: 800-514-0383**

**U.S. Dept. of Education, Office for Civil Rights**
**Iimaylka: ocr@ed.gov**
**Telefoonka: 202-453-6100 ama 800-421-3481**
**TDD: 800-877-8339**
**Gargaarka Luqadda: 800-USA-LEARN (800-872-5327)**

**OCR ayaa waliba siisa gargaar farsameed dadwaynaha oo waxaan uga jawaabi doonaa warsadka ku saabsan waajibaadyada dugsiyada iyo xuquuqda ardayda iyo waalidiintamarkay hoos timaad sharciyada ay meelmariso OCR.**

**Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan sharciyada ay meelmariyaan CRT iyo OCR, oo ay ku jiraan kuwa mamnuucaya kala qoqobka ku slaysan naafanimada iyo jinsiga (oo ay ku jirto isku-aqoonsiga jinsiga iyo waafaqsaan-la'aanta suuradaynta lab ama dheddig ahaanta), fadlan nagu soo booqatobarta internetka ee www.justice.gov/crt/edo iyowww.ed.gov/ocr.**